



**Maajo 2025 Doorasho
Gaar ah**

**Galalka Xogta
Codbixiyaasha Degmada
Multnomah oo Ku qoran
af Soomaali**

Labo qaab oo Aad Ku soo Celinayso Warqadaada Codbixinta

Ku soo celi Warqadaada Codbixinta boostada adoo adeegsanaaya boqshada boosto celinta lacagteeda horey loo baxshay marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada; ama Ku soo Celin Warqadaada Codbixinta Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ugu danbayn 8:00 fiidnimo Maalinta Doorashada Maajo 20, 2025.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah

Maajo 20, 2025

Doorashada Degmo Gaar ah

**Codbixinta Luuqadaha Badan
Xog Faahfaahsan**

Isdiwaan geli si aad u codeyso ugu danbayn **Talaadada, Abriil 29, 2025**. Haddii loo baahdo, wax ka badel xogtaada diiwaan gelinta codbixiyaha ama iska diiwaan geli si aad uga codeyso barta OregonVotes.gov/MyVote.

Goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah ayay saamayn kasoo gaartay xiritaannada dhismaha maktabada ee doorashadaan.

Gudaha waxaa ka helaysaa xog dheeraad ah oo ku saabsan isbadelada goobaha ee Goobta Codbixinta Rasmiga ah.

**Dhismaha Doorashooyinka Degmada Multnomah Duniway-Lovejoy
(Multnomah County Duniway-Lovejoy Elections Building)**
1040 SE Morrison Street
Portland, OR 97214

Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express)
(Ku dhex taala Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building))
600 NE 8th Street, Gresham, OR 97030
Furan Abriil 28 – Maajo 20, 2025

#MultnomahVotes
@MultCoElections

Taleefanka: 503-988-VOTE | 800-735-2900 TTY

Codbixiyaasha Degmada Multnomah ee Qaaliga ahow: Kani waa Galka Xogta Codbixiyaha ee Doorashooyinka Waaxda Gaarka ah oo dhacaaya Maajo 20, 2025. Galkaan xogta ayaa boostada loogu diray dhammaan xubnaha qoysaska degan Degmada Multnomah waxaana ku jirta xog ku saabsan musharixiinta iyo mawduucyada codeynta ee kasoo baxay waaxaha maxaliga ah ee gaarka ah oo ku dhex yaala Degmada. Doorashooyinka maxlaiga ah waa muhiim. Fadlan akhri xogta soo socota si aad codkaaga uga dhiibato doorashadaan.

- Wakhtiga loo cayimay diiwaan gelintu waa **Talaadada, Abriil 29keeda, 29, 2025.** Waxaad ka arki kartaa marxalada diiwaan gelintaada waxna waad ka badeli kartaa haddii loo baahdo adoo booqanaayat www.OregonVotes.gov/MyVote
- Waaxda Badqabka Daadka Magaallada iyo Tayada Biyaha: Tani waa doorashadii koobaad oo **toos ah** oo lagu dooranaayo agaasimeyaasha waaxdaan. Si loo dhaqan gasho shuruudaha kala qaybsan, agaasimeyaasha la doortay bishii Maajo ayaa soo bandhigi doona boosas kadib doorashada si loo go'aansho labada boos ee loo codeyn doono doorashada Maajo 2027 iyo sadexda boos ee lagu dari doono codbixinta Maajo 2029.
- **Lix goobaha sanduuqyada codbixinta rasmiga ah ayay saamayn kasoo gaartay xiritaannada dhismaha maktabada ee doorashadaan. Goobahaan waxaa kamid ah: Albina, Belmont, Kenton, Rockwood, St. John's, iyo Woodstock libraries.** Haddii aad si joogto ah u booqato midkood goobahaan maktabada, fadlan akhri boggeen Xogta Isbadelka ku dhacay Goobaha Sanduuqyada Codbixinta Rasmiga ah si aad u hesho faahfaahin dheeri ah oo ku aadan sida loo keeno warqadaada codbixinta midkood goobaheena cusub ee sanduuqa codbixinta rasmiga ah. Fadlan nala soo xiriir haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo dhiibashada codkaaga.
- **Si aad u hesho liiska goobaha rasmiga ah ee sanduuqa Codbixinta ee Degmada Multnomah, fadlan booqo webseedkeena:**
www.MultCo.us/DropSites

Warqadaha codbixinta ayaa boostada loogu diri doonaa codbixiyaasha diiwaan gashan maalinta Arbacada ah, Abriil 29keeda, 30, 2025. Haddii aadan helin warqadaada codbixinta ugu danbayn Khamiista, Maajo 8deeda, 8, 2025, fadlan wac 503-988-VOTE (8683) ama iimeyl u dir elections@multco.us.

Si loo tiriyo, warqadaha codbixinta la dhiibtay waa in **la keenaa xafiiska doorashooyinka degmada ee Oregon ama Goobta Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah** ugu danbayn **8:00 p.m., Talaadada, Maajo 20keeda, 20, 2025**, ama **waa in boostada lagu soo diraa ugu danbayn Talaadada Maajo 20keeda, 20, 2025.**

Waxaa intaas dheer, kahor doorashada waxaan ka codsanaynaa codbixiyaasha **Aan Qorshe U samaysano si aan U CODEYNO!** Halkaan ayaad ka helaysaa waxa aad samayn karto si aad ugu diyaar garoowdo doorashada aadna u xaqiijiso in codkaaga la tiriyo.

1. **Isku diiwaan gelinta CODBIXINTA.** Wax ka badel xogtaada diiwaan gelinta codbixiyaha ama iska diiwaan geli si aad uga codeyso barta OregonVotes.gov/MyVote. Mudada ay ku Eg Tahay Is Diiwaan Gelinta Cod Bixiyuhu waa Abriil 29. Iska diiwaan geli La Soco Warqadaada Codbixinta barta Multco.us/TrackYourBallot.
2. **Hel Warqaddaada Codbixinta.** Waxaad helaysaa warqadaada codbixinta oo laguugu soo diraayo boostada laga bilaabo Abriil 30. Haddii aadan helin warqadaada codbixinta ugu danbayn Maajo 8, talaabo qaad oo la xiriir xafiiska doorashooyinka.
3. **Ku CODEE Warqadaada Codbixinta.** Xasuusnoow inaad saxiixdo boqshada aad ku celinayso warqadda codbixinta. Saxiixaagu waa aqoonsigaaga. Haddii aad iloowdo inaad saxiixdo ama ama saxiixaagu uusan waafaqsanayn waan kula soo xiriiri doonaa si aad talaabo u qaado kadibna aan u tirino codkaaga.
4. **Soo celi Warqadaada Codbixinta** Labo qaad oo aad ku ku soo celinayso warqaddaada codbixinta – **1) Ku soo celi boostada**, boqshadaada warqadda codbixinta waa in lagu calaamadiyaa boostada ugu danbayn Talaadada, Maajo 20 lana helaa todobo maalmood gudahood si loo tiriyo. **2) Sanduuqa Codbixinta Codbixinta Rasmiga ah**, warqadaha codbixinta la buuxshay waa in ay yimaadaan xafiiska Doorashooyinka Degmada ee Oregon ama goobta goobta sanduuqa rasmiga ah ugu danbayn 8:00 p.m., Talaado, Maajo 20.
5. **Lahoow COD oo samee isbadel.** Natiijooyinka doorashada ee aan rasmiga ahayn ayaa lasoo bandhigi doonaa kadib 8 PM Maajo 20 ciwaanka MultnomahVotes.gov. Natiijooyinka doorashada ee rasmiga ah ayaa la xaqiijin doonaa ugu danbayn Juun 16, 2025.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad kala xiriiri kartaa xafiiskeena lambarka 503-988-VOTE (8683).

Daacadnimo,

Tim Scott,
Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada Multnomah

FADLAN OGOOW: Waaxda Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) ayaa u daabacda xogta sida loogu soo diray. Ma saxno hinkaada, shaqallada, naxwaha, jumlada, ciladaha ama xogta khaldan.

Xaqiiqooyinka aad Ka Ogaanayso Codeynta iyo Doorashooyinka

Yaa isku diiwaan gelin kara si ay uga codeeyaan Oregon?

- Waa qasab inaad tahay muwaadin Mareykan ah.
- Waa inaad dagan tahay Oregon,
- Waa inaad jirtaa ugu yaraan 16 sano. Waxaad heli doontaa warqada koobaad ee codbixinta oo laguugu soo dirayao boostada marka aad jirto ugu yaraan 18 sano.

Waa inaad isku diiwaan gelisaa inaad codeyso ugu yaraan 21 maalmood kahor Maalinta Doorashada.

Sidee ayaan iskugu diiwaan gelin karaa codbixinta?

- Barta oonlaynka ah oo ah oregonvotes.gov/register ama
- Kaarka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha ee Oregon oo warqad ah kaasoo laga soo qaadan karo xafiiska doorashada, DMV, maktabada dadwaynaha, ama xafiiska boostada.

Sidee ayay codeynta lagu diro boostadu u shaqeysaa?

Dhammaan doorashooyinka Oregon waxaa qabta xafiiska doorashooyinka degmada. Xafiiska doorashooyinka ayaa warqadaha codbixinta boostada toos ugu dira codbixiyaasha. Codbixiyaasha ayaa buuxinaaya warqadahooda codbixinta, kadibna ku celinaaya xafiiska doorashooyinka ee degmada oo loogu diraayo boostada ama waxaa lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah.

Ku dir codbixinta boostada adoo raacaaya dhawr talaabo oo fudud:

- 1) Isku diiwaan gelinta Codbixinta
- 2) Hel Kaarka Ogeysiiska Codbixiyaha
- 3) Hel Galka Xogta Codbixiyaha
- 4) Hel Warqadaada Codbixinta
- 5) Ku Codee Warqadaada Codbixinta
- 6) Soo celi Warqadaada Codbixinta

Sidee ayaan ugu codeynayaa warqadeyda codbixinta?

Hel jawaabta musharaxa ama qodobka loo codeynaayo (“YES” (HAA) ama “NO” (MAYA)) ee aad dooranayso. Gebi ahaanba khad madoow ku masax goobinta geeska bidix ee dookhaaga adoo adeegsanaaya khadda buluuga ah ama madoowga ah. Ha adeegsan qalin koobiyo.

Codadka Qorista Dookha

Si aad u qorto codka musharax aan ku jirin liiska warqada codbixinta, si buuxda u calaamadi goobinta geeska bidix ee laynka loo sameeyay xafiiska loo tartamaayo kadibna ku qor magaca buuxa ee musharaxa laynkaas.

- Xaqiiji inaad si sax ah u calaamadisay dookhaaga tartan kasta.
- Warqadaada codbixinta rasmiga ah ayay ku qornaan karaan tartannada daabacan labada dhinacba.
- Ku rid warqadda codbixinta boqshada soo celinta ee aqoonsiga leh.
- Akhri Bayaanka Codbixiyaha oo ku qoran boqshada soo celinta kadibna saxiix godka saxiixa.
- **Warqadaada codbixinta lama tirin doono haddii aadan saxiixin boqshada soo celinta.**
- Saxiix kasta waxaa loo eegayaa saxiixa diiwaan gelinta ee ku qoran galka. Saxiixyadu waa inay iswaafaqaan si warqada codbixinta loo tiriyo.

Haddii aad u codeyso musharixiin ka badan inta loo ogol yahay xafiis ama haddii aad ku codeyso **labadaba** Yes (Haa) **iy**o No (Maya) qodobka loo codeynaayo, waxaa la yiraahdaa codbixin xadkeedii dhaaftay **codkaagana lama tirin doono** tartankaas.

Haddii aad khalad samayso ama aad badesho fikirkaaga inta aad calaamadinayso warqadaada codbixinta.

- Adiga ayaa sixi kara.
- **Ka dhig dookhaaga mid si cad loo fahmaayo** si ujeedadaada loo fahmo codkaagana loo tiriyo si sax ah.

Haddii aadan awoodin inaad saxdo warqadaada codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta oo badel ah oo aad ka helayso xafiiska doorashooyinka

Soo celi Warqadaada Codbixinta

Ku soo dir warqadaada codbixinta Boostada Mareykanka.

Waa inaad boostada kusoo dirtaa marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada, Talaadada, Maajo 20, 2025. Ku soo dirista boostadu qasab maaha.

Ku rid warqadaada codbixinta midkood goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Oregon ugu danbayn 8:00 p.m. marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada, Talaadada, Maajo 20, 2025.

Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo furan 24 saac

Portland

North

- **Rose Quarter** – oo ku taala geeska koonfureed ee Rose Quarter qaybta biyo dhaca iyo boorka Rip City – **lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School)** – 8315 N Lombard St. – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala geeska wadada ee cirifta waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo Charleston Ave. – **Socodka kaliya**
- **Paul Bunyon Statue – CUSUB** – Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku yaala isgoyska N Interstate iyo Denver Ave. – **Socodka kaliya**
- **Maktabada North Portland (North Portland Library)** (Library Book Drop) – 512 N Killingworth St.
- **Dukaanka Adeegga ee Horay loo Oran jiray Green Zebra (Green Zebra Grocery)** – 3011 N Lombard St. – Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo. **Socod kaliya**
- **Seeraha McCoy (McCoy Park)** – oo ku taala geeska koonfur bari ee Seeraha McCoy (McCoy Park) oo u dhow isgoyska N Trenton St. iyo Newman Ave. – **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**

Northeast

- **Xarunta Degmada Matt Dishman (Matt Dishman Community Center)** – 77 NE Knott St. **Lug keliya ayaa lagu geli karaa**

- **Maktabada Hollywood (Hollywood Library)** (Aaga Buugta la Keeno ee Maktabada) – 4040 NE Tillamook St.
- **Maqaayadda McDonald's (McDonald's Restaurant)** – 2010 NE César E Chávez Blvd. – Sanduuqa codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska galbeed ee NE 40th Ave. inta u dhexaysa NE Tillamook St. iyo Hancock St. iyo aaga Maktabada Hollywood (Hollywood Library).
- **Maktabada Gregory Heights (Gregory Heights Library)** (Aaga Buugta la Keeno ee Maktabada) – 7921 NE Sandy Blvd.
- **Xaafada Parkrose (Parkrose Neighborhood)** – 4390 NE 102nd Ave. – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala aaga baakinka bariga ee wadada ka timaada Xarunta Seeraha MHCC Maywood (MHCC Maywood Park Center) oo marta NE 102nd Ave. iyo Prescott St.

Northwest

- **Maktabada Northwest (Northwest Library)** (Aaga Buugta La Keeno ee Maktabada) – 2300 NW Thurman St.

Southeast

- **Waaxda Doorashooyinka ee Multnomah (Multnomah County Elections)** – 1040 SE Morrison St.
 - **SE 11th Avenue** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska bari ee SE 11th Ave. inta u dhexaysa SE Morrison St. iyo Belmont St.
 - **SE Belmont Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala geeska waqooyi ee SE Belmont St. inta u dhexaysa SE 10th Ave. iyo 11th Ave.
 - **1040 SE Morrison Street** – Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Lugta lagu tagaayo/Baaskiilka lagu geli karo ayaa ku yaala aaga geeska dhismaha ku yaala koonarka SE 11th Ave. iyo Morrison St.
- **Hawthorne Holds Pickup** (Library Book Drop) – 3557 SE Hawthorne Blvd. – Codbixiyeyaashu waxay isticmaali karaan buuga codbixinta lagu rido ama sanduuqa lagu rido codbixinta ee maxaliga ah..
- **Maktabada Holgate (Holgate Library)** – 7905 SE Holgate Blvd. – Sanduuqa Codaynta ee Rasmiga ah wuxuu dhinaca bidix ka xigaa maktabadda aan xiriirka lahayn ee dhinaca bidix ww dhismaha, ee u dhow qaybta baarkinka. **Socod kaliya.**
- **Maktabada Midland (Midland Library)** - 805 SE 122nd Ave.– Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee Rasmiga ah ayaa ku xiga booska soo celinta buugga ee dhinaca koonfureed ee dhismaha. Waxaa waraaqaha codbixinta sidoo kale lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee yaala qaybta barakinka ee maktabadda.
- **Portland Mercado** – 7238 SE Foster Rd. – Sabduuqa Codbixinta rasmiga ah wuxuu ku yaalaa qasriga Portland Mercado at SE Foster Rd. iyo 72nd Ave. **Socod kaliya.**

- **Regal Cinemas Movie Theater / M & M Car Wash** – SE Division St. iyo 165th Ave.— Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ayaa yaala aagga baakinka ee Theater-ka Filimada ee Regal Cinemas oo ka danbeeya M & M Car Wash.
- **Maktabada Rockwood (Rockwood Library)** – 17917 SE Stark St. – Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.
- **Maktabada Sellwood – Maktabada Moreland (Sellwood – Moreland Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 7860 SE 13th Ave.
- **Rockwood Woodstock (Woodstock Library)** – 6008 SE 49th Ave. – Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.

Southwest

- **A-Boy Supply** – 7365 SW Barbur Blvd.
- **Maktabada Capitol Hill (Capitol Hill Library)** (Aaga Buugaagta la Keeno ee Maktabada) – 10723 SW Capitol Hwy.
- **Midland Hillsdale (Hillsdale Library)** (Library Book Drop) – 1525 SW Sunset Blvd.
- **Maktabada Central (Central Library)** (Aaga Buugta la Keeno ee Maktabada) – 801 SW 10th Ave. – Warqadda Codbixinta ayaa lagu ridi karaa aaga **gaariga lagu maro ee** ee buugta la dhigo oo ku yaala SW 11th Ave. inta u dhexaysa SW Yamhill St. iyo Taylor St.
- **Pioneer Courthouse Square** – 700 block of SW Broadway (oo ku xigta Starbucks kana soo horjeeda Nordstrom) – **Keliya lug ayaa lagu geli karaa.**

Fairview

- **Maktabada Fairview – Columbia (Fairview – Columbia Library)** (Library Book Drop) – 1520 NE Village St.

Gresham

- **Maktabada Gresham (Gresham Library)** (Library Book Drop) – 385 NW Miller Ave. – Waxaa waraaqaha codbixinta sidoo kale lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee yaala qaybta barakinka ee maktabadda.
- **Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) – Saacadaha Kooban** – Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building), 600 NE 8th St. – Waxaa jira Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo yaala gudaha Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) oo ku taala dabaqa koobaad ee Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building). Waxay furan tahay keliya inta lagu jiro saacadaha xarunta codbixintu furan tahay. Waxaad u baahan doontaa inaad baakinka gaariga dhigato aadna lugayso si aad ugu rido warqadaada codbixinta.

Troutdale

- **Maktabada Troutdale (Troutdale Library)** (Library Book Drop) – 2451 SW Cherry Park Rd.

Isbadellada Goobta ee Goobta Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah

Si aad u hesho xogta xiritaanka Maktabada Degmada Multnomah (Multnomah County Library) booqo: <https://multcolib.org/library-construction-closures>

Ku rid warqadaada codbixinta midkood goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee Oregon ugu danbayn 8:00 p.m. marka la gaaro ama kahor Maalinta Doorashada, Talaadada, Maajo 20, 2025.

Si aad u hesho liiska goobaha rasmiga ah ee sanduuqa Codbixinta ee Degmada Multnomah, fadlan booqo webseedkeena: www.MultCo.us/DropSites

North Portland

Maktabada Kenton (Kenton Library) – 8226 N Denver Ave.
Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad adeegsato Maktabada Kenton si aad u keento warqaddaada Codbixinta, sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee kuugu dhow ayaa ku yaala Paul Bunyon Statue geeska koonfur galbeed ee isgoyska u dhexeeya N Interstate Ave. iyo Denver Ave. Kani waa sanduuqa cod-bixinta ee lagu yimaado lug.

Maktabada St. John's (St. John's Library) – 7510 N Charleston Ave.
Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad adeegsato Maktabada St. Johns (St. Johns Library) si aad u gayso warqadaada codbixinta, fadlan ogoow: sanduuqa codbixinta rasmiga ah ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa geeska wadada ee Dugsiga Hoose ee James John (James John Elementary School) (8315 N Lombard St.) ee geeska waqooyi-galbeed ee N Lombard St. iyo N Charleston Ave. Kani waa sanduuqa cod-bixinta ee lagu yimaado lug.

Northeast Portland

Maktabada Albina (Albina Library) – 216 NE Knott St.
Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad adeegsato Maktabada Albina (Albina Library) si aad u keento warqadaada codbixinta, fadlan ogoow: sanduuqa codbixinta rasmiga ah ee kuugu dhow wuxuu ku yaalaa banaanka Xarunta Degmada Matt Dishman (Matt Dishman Community Center) (77 NE Knott St.). Kani waa sanduuqa codbixinta ee lugta lagu galo

Southeast Portland

Albina Belmont (Belmont Library) – 1038 SE César E Chávez Blvd.

Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Haddii aad u adeegsato Maktabada Belmont (Belmont Library) si aad u keento warqadaada codbixinta, fadlan ogoow: sanduuqa codbixinta rasmiga ee kuugu dhow ayaa ku yaala gudaha Aaga Buugta laga Qaado ee Maktabada Degmada Hawthorne Holds Pickup (3557 SE Hawthorne Blvd.). Codbixiyaasha ayaa adeegsan kara aaga buug dhigista iyo sanduuqa Lagu Rido Codbixinta ee gudaha.

Maktabada Rockwood (Rockwood Library) – 17917 SE Stark St. (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah)

Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ee 24 saac furan ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.

Maktabada Woodstock (Woodstock Library) – 6008 SE 49th Ave. (Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah)

Maktabada ayaa loo xiray dhismo ka socda awgiis.

Sanduuqa Lagu Rido Codbixinta Rasmiga ah ee 24 saac furan ayaa ku yaala geeska lagu lugeeyo.

Qeexitaannada Doorashada

Doorashooyinka waaxda gaarka ah ayaa dhaca Khamiista sadexaad bisha Maajo sanadaha tiro dheeriga ah. Doorashada dhacaysa Talaadada, Maajo 20keeda, 2025 waa Doorashada Waaxda Gaarka ah oo loo adeegsado in lagu doorto xubnaha gudiga waaxaha gaarka ah, sida gudiyada dugsiga, waaxda biyaha, iyo waaxaha dab damiska.

Waaxda Kuleejka Bulshada

Kuleejyada bulshada, mararka qaarna loogu yeero kuleejyada hoose, waa dugsiyada labada sano la dhigto oo bixiya waxbarashada dugsiga sare kadib. Gobalka Oregon,

kuleej kasta oo bulsho ayaa leh Gudiga Kuleejka Bulshada oo lasoo doorto kaasoo dejiya siyaasada kuleejka. Gudiga ayaa kormeera hormarinta barnaamijyada iyo adeegyada, dhaqan gelinta siyaasaadka iyo miisaaniyada, si loo daboolo baahiyaha waaxda kuleejka.

Waaxda Adeegga Waxbarashada

Waaxda Adeegga Waxbarashada (Waaxda Adeegga Waxbarashada, Education Service District ESD) waa wakaalad waxbarasho oo heer deegaan ah. ESD-yadu waxay ka shaqeeyaan inay siiyaan waaxaha kaladuwan ee dugsiyada noocyada badan ee barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada, kuwaasoo qaar badan oo kamid ah aad qaali u yihiin ama baahidoodu ay kooban tahay hal meel. Waaxda Adeegga Waxbarashada ee Multnomah (Multnomah Education Service District MESD) waa iskaashato waxbarasho oo siisa noocyada badan ee barnaamijyada iyo adeegyada heer gobol waaxaha dugsiyada ee Degmada Multnomah iyo deegaannada ku xeeran. Gudi la doorto ayaa maamula Multnomah ESD. Shan xubnood ayaa laga soo kala doortaa xaafadaha (aaga ay ku nool yihiin), halka labo xubnood laga soo doorto degmada oo dhan.

Waaxda Biyaha

Waaxda biyaha waa bixiyaha adeegga biyaha ee deegaanka oo lagu cadeeyay Cutubka 264 ee Xeerka La Cusbooneysiiyay ee Oregon. Waacda biyaha ayaa siisa biyaha la cabo dadka dagan degmada. Gudiga waax biyood kasta wuxuu ka kooban yahay shan gudoomiyaasha gudiga ah oo ay doortaan codbixiyaashu. Gudiga ayaa masuul ka ah abuurista siyaasaadka, habraacyada, iyo miisanaiyada.

Waaxda Dab Damiska

Waaxaha Dab Damiska ee deegaannada miyiga ah waa waaxaha adeegga dam damiska oo lagu maamulo Cutubka 478 ee Xeerarka La cusbooneysiiyay ee Oregon. Waaxda Dam Damiska deegaannada Miyiga ah ayaa siisa adeegyada dab damiska iyo gurmada caafimaadka degdega ah dadka ku nool deegaanka. Waax kasta oo Dam Damiska Deegaan Miyi ah waxay ka kooban tahay shan xubnaha gudiga ah oo ay doortaan codbixiyaashu. Gudiga ayaa masuul ka ah abuurista siyaasaadka, habraacyada, iyo miisanaiyada.

Waaxda Ilaalinta Ciida iyo Biyaha

Barnaamijka Waaxda Ilaalinta Ciidda iyo Biyaha (Soil and Water Conservation District SWCD) ayaa siiya adeegyo waaxaha 45 Waaxayaha Ilaalinta Ciidda iyo Biyaha ee dhammaan Oregon. Adeegyadaan waxaa ku jira taageerada farsamada iyo kormeerka kooban ee maamulka, ayadoo yoolku yahay in la yareeyo culayska iyo khatarta labadaha ee ku dhici kara SWCDs iyo Waaxda Beeraha ee Oregon (Oregon Department of Agriculture).

Degmo Dugsiyeed

Waaxaha dugsiyada ayaa masuul ka ah maamulka dugsiyada dadwaynaha. Caadiyan, waaxda dugsiya waxaa ku jira dugsiyada hoose, dhexe ama fasallada hoose ee dugsiya sare, iyo dugsiyada sare waxaana maamula Gudiga Waaxda Dugsiya. Gudiyada waaxda dugsiya ee Oregon ayaa ka kooban todobo xubnaha gudiga ah oo lagu doorto degmo ama aag. Qaar kamid ah xubnaha guriga waa inay dagan yihiin ama laga soo doorto aaga ama qaar ayay soo doortaan codbixiyaasha guud ee waaxda dugsiya.

Muddo Xileed/Muddo Xileed aan Dhicin

Xubnaha gudiga ayaa shaqeeya muddo xileed afar sano ah. Haddii boos ka banaanaado Gudiga, doorasho ayaa la qaban karaa si loo buuxsho booska banaan muddo xileedka aan dhicin ee haray oo ah 2 sano.

Qeexitaanno dheeraad ah ayaa laga heli karaa barta: <https://multco.us/info/election-definitions> [Oregon.gov/languages/pages/glossary.aspx](https://oregon.gov/languages/pages/glossary.aspx)

Qodob Loo Codeynaayo ee 5-305 – Waaxda Dab-damiska Scappoose (Scappoose Fire District)

Ku sii wad shanta sano ee levy levy oo loogu talagalay degmada dab-damiska (Scappoose Fire District)

Su'aasha: Ma sii wadi doontaa Waaxda Dab-damiska ee Scappoose (Scappoose Fire District) cashuurta \$1.99 halkii \$1,000 ba muddo shan sano poo kale ah si loo maalgeliyo hawlaha muhiimka ah ee caafimaadka/dab damiska? Qodobkaan Loo Codeynaayo waxay cusboonaysiinaysaa cashuuraha ikhtiyaariga ah ee maxaliga ah ee hadda jira.

Soo Koobid: Qodob Loo Codeynaayo ee la soo jeediyay waxay doonaysaa in la sii wado cashuurta \$1.99 halkii \$1,000 ee qiimaha hantida la qiimeeyay ee Waaxda Dab-damiska Scappoose (Scappoose Fire District), taasoo maalgelin doonta kharashaadka hawlgalka muhiimka ah laga bilaabo 2027 ilaa 2031. Dakhligani wuxuu muhiim u yahay dhowr adeegyo muhiim ah, oo ay ku jiraan shaqaale joogto ah oo ah laba ambalaas 24/7 oo ay ku jiraan dawooyinka iyo qalabka taageera hawlaha jawaabta. Maalgelintu waxay hubin doontaa u hoggaansanaanta baaritaanka caafimaadka ee NFPA ee dab-damiyayaasha. Lacagaha cashuurta waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu fuliyo shuruudaha federaalka iyo OSHA ee tijaabinta iyo beddelka qalabka ilaalinta shaqsiga. Lacagaha waxaa loo isticmaali doonaa kormeerka sanadlaha ah ee badqabka iyo dayactirka afarta saldhig ee dab-damiska. Lacagaha cashuurta waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu ilaaliyo u hoggaansanaanta NFPA iyo federaalka ee dayactirka iyo beddelka gawaarida degdegga ah marka loo baahdo. Dakhligga la filayo ee ka imanaya cashuurta waxaa lagu qiyaasaa inuu noqdo \$3,381,674 sanadki 2027, \$3,483,125 sanadki 2028, \$3,587,618 sanadki 2029, \$3,695,247 sanadki 2030, iyo \$3,920,287 sanadki 2031, taasoo hubin doonta ilaha muhiimka ah ee badqabka bulshada. Qiimaha cashuurta ee la qiyaasay wuxuu ku saleysan yahay xogta ka timid qiimeeyaha degmada wuxuuna tixgelinayaa suurtagalnimada qiimo dhimis lacag bixinta hore, cadaadiska, iyo heerarka ururinta.

Bayaanka Sharaxaada ah:

Qodob Loo Codeynaayo ee maalgelinta ee la soo jeediyay waa muhiim si loo ilaaliyo loona horumariyo adeegyada degdegga ah ee dhamaystiran ee ay bixiso waaxda dab-damiska. Qodob Loo Codeynaayo waxay ka hadlaysaa dhowr arrimood oo degdeg ah oo hay'adaha jawaabta degdegga ah ee naga soo food saaran, iyadoo hubinaysa in aan sii wadi karno bixinta daryeel iyo taageero waxtar leh oo aan u fidinno dadka deegaanka.

Degmadeena dabku waxay bixisaa adeegyo fara badan oo kala duwan, oo ay ku jiraan jawaabta dab-damiska, jawaabta dab-damiska, ee dabka badda (loo adeegay 16 dekedood), Barnaamijka Parames ee Sare, Beesha Paramed, Badbaadinta Biyaha, iyo badbaadinta xadhigga. Intaas waxaa dheer, waxaan ka qayb qaadanaa hawlaha hoos u dhigidda khatarta bulshada, oo ay ka mid yihiin kormeerka badqabka dabka iyo nolosha ee ganacsiyada, tababarka daminta dabka ee bulshada, iyo qorsheynta iyo tababarka jawaabta degdegga ah. Sidoo kale, waxaan sameynaa dib-u-eegisyo qorshayaasha biyaha roobaadka, alaarmiga dabka, iyo qorshayaasha badqabka dabka iyo nolosha, waxaana bixinaa koorsooyin waxbarasho STEM iyo jaamacadeed ee dugsiga sare ee Maxaliga ah, iyo sidoo kale barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan badqabka dabka oo loogu talagalay dugsiyada.

Warbixin waxay muujineysaa in nidaamka jawaabta degdegga ah ee aan wajahno uu la kulmo dalabaad muhiim ah, iyadoo tirada wicitaannada celceliska bil kasta ay muujineyso in wicitaanno degdeg ah ay isku dhafan yihiin 50% waqtiyada. Tirada sare ee wicitaannada ayaa xoojineysa muhiimadda ah in la haysto laba ambalaas oo diyaar ah 24 saacadood maalintii, iyadoo la hubinayo jawaab degdeg ah oo loo fidiyo xaaladaha degdegga ah, iyadoon loo eegin goorta ay dhacaan.

Hadda, dakhliga ka yimaada bixinta ambalaasta ayaa hoos u dhacaya, iyadoo heerka ururinta ee Medicare iyo Medicaid uu celcelis ahaan gaarayo 40%. Hoos u dhacaan dhaqaale waxuu saameyn dhaqaale ku yeelan karaa awoodda aan u leenahay bixinta adeegyada muhiimka ah iyo helitaanka daawooyinka iyo qalabka lagama maarmaanka u ah taageerada howlaha jawaabta. Helitaanka maalgelinta la soo jeediyay waxay xasilin doontaa maaliyaddeena waxayna hubin doontaa in kooxaha caafimaadka degdegga ah ay haystaan ilaha looga baahan yahay daryeel tayo sare leh.

Intaas waxaa dheer, maalgelintu waa muhiim si loogu hoggaansamo shuruudaha tijaabinta caafimaadka ee Ururka Qaranka ee Kahortaga Dabka (National Fire Protection Association NFPA) ee shaqaalaha dab damiska. U hogaansanaanta heerarkan waxay kor u qaadaan nabadgelyada iyo waxtarka shaqaalaheena, hubinta inaan la kulanno rajooyin adag oo loogu talagalay jawaabayaasha xaaladaha degdegga ah

Lacagaha cashuurta waxay sidoo kale ka caawin doonaan fulinta shuruudaha federaalka iyo Ururka Badqabka iyo Caafimaadka Shaqaalaha (Occupational Safety and Health Administration OSHA) ee tijaabinta qalabka difaaca shaqsiga ah. Imtixaan joogtada ah iyo beddelka qalabka waa lagama maarmaan si loo ilaaliyo badqabka dab-damiyeyaashadeena loogana dhigo kuwo diyaar u ah inay si nabadgalyo iyo waxtar leh uga jawaabaan xaaladaha degdegga ah.

Intaa waxaa dheer, qayb ka mid ah maalgelinta waxay taageeri doontaa kormeerka sanadlaha ah ee badqabka iyo dayactirka afarta saldhig dab-damis ee aan leenahay. Goobaha si wanaagsan loo dayactiray waa muhiim si loo hagaajiyo waxtarka hawlgalka loona hubiyo deegaan shaqo oo ammaan ah oo loogu talagalay shaqaalaha gurmada degdegga ah.

Qodob kale oo muhiim ah oo maalgelinta ka mid ah waa dayactirka iyo beddelka gawaarida degdegga ah, iyada oo loo hoggaansanaayo heerarka NFPA iyo federaalka. Hubinta in gawaarida gurmada ee aan leenahay ay ku jiraan xaalad wanaagsan ayaa muhiim u ah badqabka jawaab-bixiyeyaashadeena iyo bixinta adeegyada si degdeg ah oo waxtar u leh bulshada.

Ugu dambayn, qodob loo codeynaayo la soo jeediyay waa mid lagama maarmaan u ah sii wadista hawlgallada hadda jira iyo daboolista baahiyaha sii kordhaya ee adeegyada degdegga ah. Waxay bixineysaa maalgelinta lagama maarmaanka u ah in la hubiyo helitaanka ambalaas ku filan, taageeridda u hoggaansanaanta heerarka badqabka muhiimka ah, maalgelinta dayactirka iyo beddelka qalabka lagama maarmaanka ah, iyo dayactirka goobaha aan hayno. Marka la ansixiyo qodob Loo Codeynaayo, dadka deegaanka waxay ka caawin doonaan in bulshada ay hesho daryeelka degdegga ah ee ay mudan tahay, iyagoo ilaalinaya caafimaadka iyo badqabka dhammaan muwaadiniinta.

Macluumaadkaan waxaa bixisay: Jeff Pricher, Madaxa Dabka, Waaxda Dab-damiska Scappoose (Scappoose Fire District)

Cabirka 26-258 – Kuleejka Bulshada ee Mt. Hood (Mt. Hood Community College)

Debaajiyada waxbarashada xirfadda, kordhinta badqabka, amaanka; dayactirka xarumaha duqoobay.

Su'aasha: Ma tahay in Kuleejku cusbooneysiyo xarumaha tababarka shaqada; kor u qaado helitaanka, badqabka, amaanka; dayactirka dhismeyaasha' ma tahay In laa siiyo \$136.445 milyan oo ah daynta Maalgashiga; kormeerka muwaadinka, isla xisaabtanka loo baahan yahay?

Haddii daynta maalgashiga la ogolaado, waxaa laga bixin doonaa canshuuraha guryaha ama mulkiyada guryaha kuwaasoo aan ku jirin xadidaadada qodobada 11 iyo 11b, Farqadda XI ee Dastuurka Oregon.

Soo Koobid: Jaamacada Bulshada ee Mt. Hood (Mt. Hood Community College) wuxuu codsanayaa ansixinta daynta maalgashiga oo dhan cadadka ugu badan oo ah \$136.445 milyan si loo maalgeliyo qarashaadka kaabeyaasha, ayna ku jiraan:

Balaarinta Xarumaha Waxbarashada Xirfadda iyo Buuxinta Dalabaadka sii Kordhaaya

- Dib U soo celinta boosaska banaan si loo abuuro Xarunta Xirfadaha Caafimaadka oo tababaraysa xirfadleyaasha caafimaadka sida kalkaalisoooyinka, farsamo yaqaannada qaliinka, baxnaaniyaasha neef mareenka, iyo la taliyaasha caafimaadka dhimirka.
- Dib u cusbooneysi tignooloojiyada fasalka si loo bixiyo waxbarashada oonlaynka ah iyo mida isku dhafan.

Kor U qaadista Helitaanka Bulshada

- Hormarinta barkadda dabaasha ee bulshada, ayna ku jiraan daboolka barkadda dabaasha si sanadka dhan loo isticmaalo, kordhinta fursadaha isticmaalka bulshada sida casharada dabaasha iyo munaasabadaha maxaliga ah.
- **Kordhinta helitaanka.**

Sugida amaanka Xarunta

- **Kor u qaadista amaanka** ayadoo la casriyaynaayo awoodaha xanibaada goobta, dab damiska, iyo kahortaga saamaynta dhul-gariirka.

Dayactirka Xarumaha Duqoobay

- **Casriyaynta nidaamka duqoobay ee dhismayaasha barisamaadkii 1970-aadkii**, ayna ku jiraan saqafyada, darbida, sagxadda, HVAC iyo korontada.

- Hagaajinta Goobta, duminta, alaabooyinka, qalabka, qiimaha soo saarista
- **Gobalka ayaa la filayaa inuu bixiyo \$8 milyan oo lacag kabis ah.**

Daynta maalgashiga ayaa lagu bixin karaa taxaneyaalka badan, ayadoo qaangaaraysa 21 sano gudahood laga bilaabo marka la bixiyo. Qiimaha canshuurta oo lagu qiyaasay \$0.25 calaa \$1,000 kasta oo qiimaha guriga ah. Qiimaha rasmiga ah ee canshuurta ayaa ka duwanaan kara sabab la xiriirta isbadellada ku dhaca qiimeyaasha dulsaarta marka daynta la bixinaayo ama qiimaha guriga lagu qiimeeyay.

Bayaanka Sharaxaada ah:

Ayadoo la aasaasay 1966, Jaamacada Bulshada ee Mt. Hood (Mt. Hood Community College MHCC) wuxuu u adeegaa 18,000 arday oo ka kala socda dhammaan 3 xarumood oo ku kala yaala Government Camp ilaa East Portland iyo dhammaan deegaannada u dhexeeya—Sandy, Corbett, Gresham, Fairview, Wood Village iyo Troutdale.

SIDA MHCC HADDA UGU ADEEGU BULSHADEENA:

Buuxinta Baahiyaha Heer Gobal

Shantii sano ee lasoo dhaafay, MHCC ayaa tababaray ku dhawaad 1,000 xirfadleyaasha caafimaadka ah wuxuuna bixiyay 60,000+ saacadood oo ardayda mutadawiciinta ah baxsheen lana siiyay isbitaallada iyo rugaha caafimaadka ee maxaliga ah.

Doorarka uu ka Qaatay Dhaqaalaha Maxaliga ah

Ardayda ka qalin jebisay MHCC ayaa ku biiriya in ka badan \$350 milyan sanad kasta dhaqaalaha maxaliga ah ee degmooyinka East Multnomah iyo Clackamas.

Xoojinta Shaqaalaheena

MHCC waa bixiyaha tababarka shaqada, asagoo taageera xirfadaha daryeelka caafimaadka, gurmada degdega ah, waxbarashada, ganacsiyada xirfadda leh, ganacsiyada yaryar, iyo waxyaabo kale oo badan.

Ilaalinta Dhaqaalaha

Asagoo ah kuleejka keliya ee Oregon ee helay Abaal Marinta Triple Crown ee Ururka Saraakiisha Dhaqaalaha ee Dawlada (Government Financial Officers Association), taasoo ay ku jirto bixinta warbixinnada faahfaahsan ee sanadlaha ah ee dhaqaalaha kuwaasoo muujinaaya hufnaanta, MHCC ayaa ku dedaala maamulka masuuliyadda ee lacag canshuur bixiyaasha.

KULEEJKU WUXUU U BAAHAN YAHAY TAAGEERADA BULSHADA SI KOR LOOGU QAADO LOONA BALAAARSHO XARUMAHA

Gudiga Waxbarashada ee MHCC (MHCC Board of Education) wuxuu codsanayaa ansixinta codbixiyaha ee daynta maalgashiga masuuliyada guud oo dhan \$136.445 si loo maareeyo baahiyaha muhiimka ah ee dhaqaalaha, loo balaarsho fursadaha tababarka xirfadda, korna loogu qaado kaabeyaasha xarunta kuleejka.

LACAGTA KABISTA AH EE GOBALKA AYAA LA HELI KARAA

MHCC wuxuu filayaa inuu helo ugu yaraan \$8 milyan oo lacag kabis ah si loogu daboolo qarashaadka uuna ka helo Gobalka Oregon. Lacagtan ayaa ku xiraya marinka debaajigan

WAA MAXAY SABABTA AY ULIYAD SOO JEEDINAYSO CABIRKAN?

MHCC waxay cadeysay ahmiyadaha muhiimka ah si loo wanaajiyo xarumaha waxbarashada, ballaarinta tababarka shaqada, iyo kor u qaadida badbaadada jaamacadda:

Balaarinta Xarumaha Waxbarashada Xirfadda iyo Buuxinta Dalabaadka Shaqaalaha sii Kordhaaya

- Dib u adeegsiga boosaska banaan si loo abuuro **Xarunta Xirfadaha Caafimaadka**, oo tababaraysa xirfadleyaasha caafimaadka sida kalkaalisooyinka, farsamo yaqaannada qaliinka, baxnaaniyaasha neef mareenka, iyo la taliyaasha caafimaadka dhimirka.
- Dib u cusbooneysiis tignooloojiyada fasalka si loo taageero waxbarashada oonlaynka ah iyo mida isku dhafan.

Hagaajinta marin u helka bulshada

- Dayactirka **barkadda dabaashada bulshada**, ayna ku jiraan rakibaada daboolka barkadda dabaasha si sanadka dhan loo isticmaalo, kordhinta fursadaha munaasabadaha bulshada, casharada dabaasha, iyo dalxiiska.
- Hormarinta helitaanka xarunta ee dadka qaba naafada.

Kor u qaadista Badqabka iyo Amaanka Xarunta

- Kor u qaadista talaabooyinka amaanka, ayna ku jirto casriyaynta **awooda xayiraada**, nidaamyada badqabka danbka, iyo kahortaga saamaynta dhul gariirka si loo difaaco ardayda iyo shaqaalaha.

Dayactirka iyo Casriyaynta Xarumaha Duqoobay

- Xalinta baahiyaha kaabeyaasha ee **dhismayaasha 1970-aadkii**, ayna ku jiraan dayactirada saqafka, darbida, sagxadda, nidaamka kulayliyaha, hawada,

mukayfka (heating, ventilation, air conditioning HVAC), iyo nidamayada korontada.

Qarashaadka dheeraadka ah ee kaabeyaasha oo lagu daboolaaayo daynta Maalgashiga waxaa kamid ah:

- Hormarinnada xarunta, duminta, dayactirka, iyo qalabka.
- Qarashaadka la xiriira bixinta daynta Maalgashiga.

KORMEERKA BULSHADA IYO ISTICMAALKA LACAGTA

Haddii qodob loo codeynaayo la ansixiyo, Gudiga Waxbarashada ee MHCC (MHCC Board of Education) ayaa kormeeri doona dhaqan gelinta daynta Maalgashiga si loo xaqiijiyo in dhammaan lacagaha loo adeegsado mashaariicda codbixiyaashu ansixiyeen. Gudiga kormeerka ee madaxa banaan ayaa bixin doona isla xisaabta iyo hufnaan dheeraad ah.

LACAGAHA DAYNTA MAALGASHIGA AYAA KELIYA LOO ADEEGSAN KARAA MASHAARIICDA AY CODBIXIYAASHU ANSIXIYEEN

Sharciyan, lacagaha daynta Maalgashiga waxaa keliya lagu bixin karaa hormarinnada lagu cadeeyay qodob loo codeynaayo. Lacagaha **looma** isticmaal karo mushaaraadka kuliyaadda ama qarashaadka shaqada.

SAAMAYNTA DHAQAALAHA

- Waxaa lagu soo saari doonaa hal ama labo taxane waxayna qaangaaraysaa **21 sano** gudahood laga bilaabo marka la bixiyo.
- Qiyaasta qiimaha canshuurta: **\$0.25 calaa \$1,000 kasta qiimaha guriga lagu qiimeeyay.**
- Qiimaha canshuurta ee rasmiga ah ayaa kala duwanaan kara ayadoo ku xiran qiimeyaasha dulsaarta iyo qiimaha guryaha ee la qiimeeyay.

Macluumaadkaan waxaa bixisay: Jennifer DeMent, Gudoomiye Ku Xigeenka, Dhaqaalaha iyo Maamulka; Kuleejka Bulshada ee Mt. Hood (Mt. Hood Community College)

Qodob Loo Codeynaayo 26-259 – Degmo Dugsiyeed Portland 1J (Portland School District 1J)

Daynta maalgashiga si kor loogu qaado Caafimaadka, Badqabka, Waxbarashada; Casriyayn, Dayactirka Dugsiyada

Su'aasha: Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay hagaajinayaan, kuwa casri doona iskuulada; Kordhinta caafimaadka, amniga; Bixinta Bonds ayaa lagu qiyaasay inay joogteeyaan heerka canshuurta ee hadda jira?

Haddii daynta maalgashiga la ogolaado, waxaa laga bixin doonaa canshuuraha guryaha ama mulkiyada guryaha kuwaasoo aan ku jirin xadidaadada qodobada 11 iyo 11b, Farqadda XI ee Dastuurka Oregon.

Soo Koobid: Qodob Loo Codeynaayo ayaa fasaxaaya \$1.83 bilyan oo cadadka guud ah oo ah daynta maalgashiga masuuliyada guud si loogu maal geliyo xarumaha iyo waxbarashada.

Haddii la ogolaado, qodobkaan loo codeynaayo ayaa maalgelinaaya qarashaadka kaabayaasha, ayna ku jiraan:

Casriyaynta, Dayactirka Dugsiyada Hoose iyo Dhexe ee Duqoobay:

- Casriyaynta/badelida nidamayada waawayn ee dhismeyaasha, ayna ku jiraan saqafyada, darbidada, kulayliyaha/qaboojiyaha.

Samee iskuullada nabdoon oo aamin ah:

- Casriyaynta nidaamyada badqabka, amaanka
- Casriyaynta kahortaga saamaynta dhul-gariirka

Casriyaynta, Hormarinta Agabka Waxbarashada, Tiknooloojiyada iyo Dugsiyada:

- Dayactirka/badelidda dugsiyada, ayna ku jiraan Cleveland, Ida B. Wells (oo horay loo oran jiray Wilson)
- Casriyaynta agabka manhajka, tignooloojiyada, ayna ku jiraan aaladaha ardayda

Kordhinta Fursadaha Ka baxsan Manhajka:

- Casriyaynta/balaarinta xarumaha ciyaaraha ee dugsiya sare, abuurista xarumaha ciyaaraha ee degmada oo dhan oo la samaynaayo Jackson, Marshall
- Casriyaynta farshaxanka jilitaanka/xarumaha masxariyadda ee dugsiya sare

Waxay u baahan tahay isla xisaabtanka/kormeerka bulshada; isla xisaabtanka madaxa banaan ee mashruucyada iyo qarashaadka la bixiyo

Daynta maalgashiga ayaa lagu bixin karaa hal taxane ama ka badan, ayadoo taxane kasta oo qanagaaraayo 30 sano gudahood ama kayar.

Sabab la xiriiirta nidaamka daymaha oo sii daciifaaya, qodobka loo codeynaayo ayaan la filayn inuu kordhiyo qiimaha canshuurta daynta Maalgashiga ee PPS wax ka badan \$2.50/\$1,000 qiimaha guriga ee la qiyaasay, qiimaha ayaa sidaas ahaa ilaa dayntii maalgashiga ee 2017. Qiimeyaasha rasmiga ah ayaa kala duwanaan kara ayadoo ku xiran qiimeyaasha dulsaarta iyo isbadellada qiimaha guriga.

Bayaanka Sharaxaada ah:

Haddii la ansixiyo, qodobkaan loo codeynaayo ayaa u sahlaaya Dugsiyada Dadwaynaha ee Portland (Portland Public Schools) inay sii wado inay muhiimada saarto dugsiyada u baahan dayactirada waawayn iyo isbadellada si loo xaliyo khataraha badqabka loona dayactiro kaabeyaasha burburay.

Qodobkaan loo codeynaayo ayaan la filayn inuu kordhiyo qiimaha canshuurta heer ka sareeya heerka lagu cayimay dayntii maalgashiga ee 2017.

Sanadihii 2012, 2017, iyo 2020, codbixiyaasha ayaa ogolaaday daynta Maalgashiga kaabeyaasha oo lagu maal geliyay qaybo badan oo kamid ah dhismayaasha gaboobay ee Dugsiyada Dadwaynaha ee Portland (Portland Public Schools), angoo abuurayna goobaha casriga ah, ee amaanka u leh ardayda si ay wax ugu bartaan.

Ilaa sanadkii 2012, barnaamijka daynta Maalgashiga ayaa leh sideed dugsi oo gebi ahaanba la casriyeeyay, ayadoo sadex kale ay naqshadeyn ku socoto. Waxaa intaas dheer, barnaamijka daynta Maalgashiga ayaa xaliyay qaar kamid ah baahiyaha kaabeyaasha ee dugsi kasta dhammaan Degmada.

Maal gashiyada hore waxaa kamid ah:

- Roosevelt, McDaniel, Franklin, Grant, Benson, iyo Dugsiyada Sare Lincoln (Roosevelt, McDaniel, Franklin, Grant, Benson, and Lincoln High Schools), Dugsiga Dhexe Kellogg (Kellogg Middle School), Faubion PK-8, iyo dhismaha Multiple Pathways to Graduation kaasoo si buuxda loo casriyeeyay.
- Casriyaynta Jefferson, Ida B. Wells, iyo Dugsiyada Sare ee Cleveland ayaa naqshad ku socotaa.
- Hormarinnada caafimaadka iyo badqabka, ayna ku jiraan:

- Bedeelka tuubooyinka si loo yareeyo sunta dalawandiga iyo in kor loo qaado tayada biyaha;
 - Bixinta ama xirida riinjiga leh sunta dalawandiga iyo asbestos;
 - Cariyaynta ganbaleelka dabka iyo nidaamka biyo firdhinta;
 - Dayactirka ama badelida saqafyada dilaaca ama kasii dara;
 - Yareynta u banbixida maadada radon;
 - Xoojinta badqabka iyo amaanka dugsiga.
- Hormarinnada waxbarashada, ayna ku jiraan:
 - Casriyaynta shaybaarada sayniska;
 - Kor u qaadista tignoolojiyada;
 - Agabka manhajka cusub.
 - Hormarinnada helitaanka carruurta iyo dadka waawayn ee naafada.

Maxay Daynta Maalgashiga ee Lagu Taliyay 2025 Maal gelinaysaa?

Haddii la ansixiyo, lacagta daynta maalgashiga ayaa xalinaaya baahiyaha dheeriga ah ee dhismaha, caafimaadka, badqabka, iyo waxbarashada dugsiyada dhammaan degmada, ayadoo haddana la sii wadaayo qorshaha PPS ee xalinta si guud baahiyaha xarunta ayadoo kor loo qaadaayo dhammaan dugsiyadeena mudada dheer.

Haddii la ansixiyo, lacagta daynta maalgashiga ayaa:

Cusboonaysiinta iyo Dayactirka Dugsiyada Hoose iyo Dhexe ee Duqoobay:

- Casriyaynta ama badelidda saqafyada dugsiga ee sii xumaanaaya, nidamayada farsamada (kulayliyaha iyo qaboojiyaha), iyo dayactirada kale ee dhismaha

Samee iskuullada nabdoon oo aamin ah:

- Cusboonaysiinta nidaamyada badqabka iyo amaanka - ayna ku jiraan kaamirooyinka dheeraadka ah, xayndaabyada si loo difaaco ardayda iyo shaqaalaha
- Casriyaynta kahortaga saamaynta dhul-gariirka

Casriyaynta, Hormarinta Agabka Waxbarashada, Tiknooloojiyada, Dugsiyada:

- Dib-u-cusboonaysiinta / Beddelka Dugsiyada Sare ee Cleveland iyo Ida B. Wells (Cleveland and Ida B. Wells High Schools) (horay loo oran jiray Wilson)
- U adeegsiga qarashyada laga kaydiyo hormarinta dugsi kasta oo sare si loo casriyeeyo/loo dayactiro dugsiyada hoose iyo dhexe.
- Bixinta agabka manhajka oo balaaran, dhaqan ahaan quseeya, oo cusub dhammaan maadooyinka aasaasiga ah iyo kuwa kabista ah.

- Badelida ama siinta ardayda taableedyo iyo laabtoobyoo si loo baxsho helitaanka cadaalada ah ee waxbarashada fasalka, loona cusbooneysiyo tignooloojiyada fasalka iyo Degmada.

Kordhinta Fursadaha Ka baxsan Manhajka:

- Casriyaynta xarumaha ciyaaraha, ayna ku jiraan hormarinnada looga baahan yahay Roosevelt, Lincoln, Franklin iyo Grant iyo abuurista xarumaha ciyaaraha oo laga dhisaayo xarunta Dugsiga Dhexe ee Jackson (Jackson Middle School) iyo Marshall.
- Casriyaynta farshaxanka jilitaanka/xarumaha masxariyadda ee dugsiga sare.

Meega ayay noqonaysaa Qiimaha Daynta Maalgashiga?

Sabab la xiriiirta qiimaha canshuurta ee daynta Maalgashiga ee hadda jirta oo la filaayo inuu hoos u dhaco, qiimaha canshuurta daynta Maalgashiga ee PPS ayaan la filayn inuu dhafo qiyaastii hore oo ahayd \$2.50 calaa \$1,000 oo ah qiimaha guriga la qiyaasay. Wadarta guud ee lacagta daynta Maalgashiga oo lagu ansixiyay qodobkaan loo cocdeynaayo ayaan ka badan karin \$1.83 bilyan.

Kormeerka iyo Isla Xisaabtanka

Koox madax banaan oo xubnaha bulshada kamid ah ayaa dib u eegi doonta warbixinnada rubuc sanadlaha ah iyo isla xisaabtanka sida lacagta daynta Maalgashiga loo maal gashay si loo helo isla xisaabtanka hantida ummada ilaa dhismuhu ka dhamaanaayo.

Macluumaadkaan waxaa bixisay: Dr. Kimberlee Armstrong, Maamulaha Guud Dugsiyada Dadwaynaha ee Portland (Portland Public Schools)